

# Lessebo kommun informerar

## Ku saabsan isbeddelada qorsheysan ee dugsiyada xannaanada Lessebo

Muddo dhowr sanno ah waxa kordhay tirada carruurta dugsiyada xannaanada Lessebo. Waxa muddadan la furay qeybo ku meel gaara iyadoona ay howsha ka socotay guryo yar yar. Waxa la dhisay dugsi xannaano cusub, Galaxen, iyadoona meeshii hore Stallet ay ka socoto shaqo dib u habeyn baaxad leh si ay Äventyret howsheeda 5 jirrada halkan uga waddo. Dhammaadka bisha sebteember ayuu dib u dhiska dugsiga xannaanada Äventyret (oo horey loo oran jiray Stallet) dhammaan doonaa iyadoona sannad dugsiyeedka 2021/2022 ay halkaa ka bilaaban doonto howsha 5 jirro gaaraya 70. Markay carruurtani u wareegto fasalka ka horeeya kan koowaad agoosto 2022 ayay qeyb isu beddeli doontaa howsha ”1-4 sanno” maadaama ay 5 jirrada kuwaa ku xiga ay tiro ahaan aad uga yar yihiin kuwa hadda jooga.

Xilliga la dhameystiro Äventyret ayaa guryaha yar yar la baabi'in doonaa. Taariikhda taa la fulin doono wali lama go'aamin.

Tirada carruurta 1-4 jirrada ah ee degaanka, sida la saadaalinayo, isma beddeli doonto wax badan taasina waxay mustaqbalka keeni doontaa inay yaraato carruurta dugsiyada xannaanada sida la saadaalinayo maadaama ay saadaasha 1 jirradu tahay inta u dhaxeysa 40-45 carruur.

Si loo daboolo isbeddelka dusha ku xusan waxa hadda xagaagan la sii bilaabi doonaa waafajin iyo saxidda howsha. Isbeddelada dhacaya waa in laba qeybood oo keliya ay ka furnaan doonaan Violen iyadoona aanan carruur cusub lagu meeleyn doonin balse carruurtaa waxa loo kala qeybin doonaa waaxyaha kale. Howlaha Galaxen waxa ka qeyb qaadan doono 5 qeybood oo keliya. Taa si suura gal looga dhigo loona fududeeyo rarka goobta waxqabadka Violen, carruurta iyo shaqaalaha ee Galaxen xilliga xagaaga 2022 iyo si carruur cusub boos loogu heli karo.

### Is beddeladan fooda inagu soo haya ee go'aanka laga gaaray;

Laga bilaabo agoosto 2021

- Violen ayaa ku shaqeyn doonta laba qeyb oo keliya. Carruur cusub kuma biiri doonto dugsiga xannaanadd sannad dugsiyeedka 2021/2022. Carruuraha cusub oo dhan waxa la geynayaa dugsiyada xannaanada kale ee degaanka.
- Äventyret (oo horey loogu yeeri jiray Stallet) ayuu dayar tirkiisu diyaar noqonayaa sebteember 2021. Waxqabadka 5 jirrada wuxuu u dhici doonaa laga bilaabo agoosto si caadi ah. Waxase loo guuri doonaa goleyaal la dayac tiray kadib marka ay diyaar noqdaan sebteember.
- Guryaha yar yar ee Äventyret (oo horey loogu yeeri jiray Stallet) ayaa deyrta la baabi'in doonaa. Waxqabadka howlaha dugsiga xannaanada Äventyret ayaa halkaa ka socon doona ilaa inta looga guurayo goleyaasha la dayac tiray. Taariikhda la baabi'inayo guryaha yar yar ee paviljongan wali go'aan lagama gaarin.



Lessebo kommun

# Lessebo kommun informerar

**Go'aamada jihada ee soo socda ayaa la gaaray;**

Xagaaga 2022

- Dugsiga xannaanada Violen Xagaaga 2022 ayey wax qabadka, carruurta iyo shaqaaluhu, u guurayaan dugsiga xannaanada Galaxen. Go'aankan ayaa dib loo eegi karaa haddii ay dad badan u soo guuraan degaanka sannad dugsiyeedka 2021/2022.

Waxaa hadda socda shaqo lagu qorsheynayo tallaabooyinka kala duwan ee guuritaanka si ay taasi ugu dhacdo qaab macquul ah. Adiga waalidka mas'uulka ah waxaad maamulaha ka heli doontaa warbixin faahfaahsan, ee xilliga uu dhacayo guuritaanka iyo xida loo fulinayo.

Waxan sidoo kale jeelaan lahayn inaan ka faa'iiddeysano isla markaana kuu rajeyno xagaa wanaagsan!

*Shaqaalaha, maamuleyaasha iyo maamulka degmada Lessebo*

Therese Linnér  
Madaxa waxbarashada

Tommy Gravéus  
Ku xigeenka Madaxa waxbarashada



Lessebo kommun